

Asylum Support Partnership

help and advice



March 2009

Somali

Codsashada taageero magangalyo-doonnimo

Dadka magangalyo-doonka ah intooda badan looma ogola inay shaqeeyaan. Xaalado gaar ah daraadood ayaa laga yaabaa in lagu oggalaado inaad shaqeysid laakiin waxa aad u baahan tahay inaad heshid la-talin taa ku saabsan.

Maxaa yeelay waxa laga yaabaa in qorshaynta habka magangalyo-doonku wuu dheeraan karaa, waxaad u baahan tahay inaad ka fakartid sidii aad iskaa isu caawin lahayd. Waxaa dhici karta inaad u qalanto ka-codsashada Hay'adda Xuduudka ee Boqortooyada Midowday (UK Border Agency - UKBA). UKBA waa waaxda dawladda mas'uulka uga ah taageerista dadka dhibaataada ba'ani hayso ee magangalyo-doonka ah. Taageero laga helo UKBA macnaheedu waa inay ku siin karaan meel aad degto iyo taageero lacageed (cash support). Haddii aad haysato meel aad degto, tusaale ahaan saaxiibbo iyo qaraabo, waxaa kaliya oo lagu ogol yahay inaad codsato taageero lacageed. Taageerada kaashka ah waxa kale oo loogu yeedhaa 'taageero raashin' (subsistence support).

Haddii aanad awoodin inaad naftaada taageertid, waxa aad taageero magangalyo codsan kartaa wakhti kasta inta lagu jiro habka magangalyada. Haddii UKBA iyo/ama adeegga bulshadu oggalaado in da'daadu ka hooseyso 18 sano, una codsanayso magangalyo-doonnimo naftaada uun, waxaad ka heli doontaa taageerada mas'uuliyiintaada degmada. Waxa aad taageero weydiisan kartaa wakhtiga aad codsanaysid magangalyo haddii aad u baahan tahay waana in UKBA kuu diyaariso hoy ku-meel-gaadh ah inta aad ka dhameysanaysid codsi.

Kumaa u qalma taageero inuu ka helo UKBA?

Haddii aad u baahan tahay meel aad degto iyo taageero lacageed, ama taageero lacageed kaliya. Si kasta ha ahaatee, waxay noqonaysaa inaad u xaqiijiso UKBA:

- In aad codsatay magangalyo oo aan la diidin codsigaaga
- In xaaladdaadu aad u ba'an tahay (wax yar aad haysato ama lacag iyo hoy la'aan tahay)
- In aad codsatay magangalyo 'wakhtigii ugu soo horeeyay ee caqli-gal ahaan suurogal kuu ahaa' ka dib markii aad soo gashay Boqortooyada Midowday (UK)
- In da'daadu ka weyn tahay 18 sanno

Muxuu yahay macnaha shuruudda 'wakhtigii ugu soo horeeyay ee caqli-gal ahaan suurogal kuu ahaa'?

Shuruuddaasi waxay qabanaysaa dadka codsada taageero hoy iyo kaash labadaba iyo kuwa codsanaya taageero ah kaash kaliya. . Marka aad ka fiirsanaysid inaad codsatid

Qoraalo kale oo tarjuman ayaa laga heli karaa <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Asylum Support Partnership is a partnership project hosted by the British Refugee Council
British Refugee Council, (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No 2727514] and a registered charity, [No 1014576].
Registered office: 240-250 Ferndale Road, London SW9 8BB, United Kingdom, VAT reg no: 936 519 988



taageero ah kaash kaliya (xiitaa haddii aad hore u qaadan jirtay taageero ah hoy iyo kaash oo aad imminka doonaysid inaad u beddelatid taageero ah kaash kaliya). UKBA waxay ka fiirsan doontaa waxyaabahan soo socda:

- In aad magangalyo ku codsatay gudahay saddex cisho markii aad wadanka soo gashay iyo in kale;
- In faallada aad ka bixisay imaatinkaaga tahay mid la rumeysan karo iyo in kale.

Caadi ahaan UKBA waxay warka aad siisay markii aad magangalyada codsatay u isticmaali doontaa in go'aan lagaga gaadho in aad 'wakhtigii ugu soo horeeyay ee caqli-gal ahaan suurogal kuu ahaa' ku codsatay magangalyada iyo in kale. Haddii UKBA aanay awoodin inay go'aan ka gaadhaan in lagu siiyo taageero, ama haddii ay u maleynayaan inaanad magangalyada goor hore codsan waxa, markaa, dhici kara inay kuugu yeedhaan wareysi lagu qabto Croydon, Glasgow ama Liverpool. Haddii aad UKBA u sheegtid in aanad awoodin inaad u safartid Croydon waxay markaa soo diyaarin doonaan in wareysiga lagu qabto xafiiska gobolka aad ku nooshahay. **Waxa muhiim ah inaad timaadid wareysigaa haddii aad rabtid inaad xaqiijisid inaad u baahan tahay taageero isla markaana aad magangalyada ku codsatay 'wakhtigii ugu soo horeeyay ee caqli-gal ahaan suurogal kuu ahaa'.**

UKBA kuuma diidi karto taageero haddii xaaladahan soo socda ay jiraan:

- Haddii aad qayb ka tahay xaas caruurtoodu ka hoosayso 18 sano;
- Haddii baahi gaar ah aad qabto, tusaale ahaan, mid maskaxeed ama jir ahaaneed; haddii ay ku hayso baahi gaar ahi, waxaad gar u leedahay qiimayn baahiyeed ay sameynayaan mas'uuliyiinta degmadaada sida uu dhigayo xeerka daryeelka bulshadu. Qaar ka mid dadka magangalyo-doonka ah ee baahiyaha gaarka ah qaba waxaa la siin karaa meel ay degaan iyo taageero dheeri ah oo ay ka helaan UKBA;
- Haddii aad muujin karto in wax ka baxsan bini'aadaminimada ay ku soo gaari doonaan ama laguula dhaqmo doono si sharaftaada wax u dhimaysa sida lagu qeexay Xeerka Reer Yurub ee Xuquuqaha Bini'aadamka (European Convention on Human Rights) haddii dawladdu aanay kuu ogolaan inaad kaalmo codsato. Waxaad u baahan tahay talo sharci ah si aad u aragto haddii arrintani ku khusayso iyo in kale.

Haddii aad markii horaba sharci ku joogtay Boqortooyada Midowday (UK), ka dibna aad codsatay magangalyo xaaladaha isbedalay dartood wadankaagii hooyo, UKBA waxay fiirin doontaa inaad magangalyada ku codsatay fursaddii ugu horeysay ee suurogal kuu ahayd.

Sidee baan u codsanayaa taageerada UKBA?

Ururrada qaxootiga ee ku liis-gareysan dhammaadka warqaddan ama xaashidan ayaa kaa caawin doona in codsi laguugu gudbiyo UKBA si aad heshid u taageero. Ururrada kale sida adeegga Latalinta Muwaadiniinta ee degmada (Citizens Advice service) ama kooxaha gargaarka qaxootiga ee degmada ayaa sidoo kale caawimaad ka bixin kara arrintan. Haddii lagugu hayo xarun saarid (removal centre), aadna ku guulaysato codsigaagii damaanashada ahaa, waxa dhici karta in mid ka mid ururrada qaxootiga uu kaa caawiyo codsiga taageerada UKBA.

Waxaan u baahanahay meel aan dego iyo taageero lacageed

Waad codsan kartaa meel aad degto iyo taageero lacageedba isku mar. Haddii aanad haysan meel aad ku noolaato inta aad sugaysid go'aan ku saabsan in aad taageerada UKBA

xaq u leedahay, UKBA ayaa ku geyn doona xarun dadka lagu hayo marka ugu horreysa ama hoy bilaabis ah marka aad codsatid magangalyo. Marka aad hore u codsatay magangalyo ka dibna aad sabool noqotay, urur qaxooti ayaa kuu gudbin kara UKBA si aad u heshid hoy bilaabis ah. Hoy bilaabis ah waa meel dadka magangalyo-doonka ah la dejiyo oo lagu siiyo cunto ama taageero kaash xilli ku-meel-gaadh ah.

UKBA way ii ogolaatay inay meel i dejiso

Haddii UKBA ay go'aansato inaad taageerada u qalanto, waxay kuu habeyn doonaan in lagu kaxeeyo hoyga lagu dajinayo, sida qaalibka ahna waa dibadda London iyo Koofur Bari Iglan (oo sidoo kale loo yaqaano kala-firdhin). Hoygaaga kala-firdhinta waxa uu caadi ahaan noqon doonaa isla aagga hoygaagii bilaabista ahaa. Ma yeelan doontid kala doorasho meesha UKBA ay kuu dirayso, laakiin iyaga ayaa ay tahay inay qiimeeyaan baahidaada jir ahaaneed iyo duruufahaaga gaarka ah. Ka hor intaan lagu kaxaynin hoyga ay UKBA ku siisay, waxaa lagu siin doonaa warbixin ku saabsan meesha aad ku noolaan doonto, sida aad meesha ugu safri lahayd, sida aad uga heli karto taageero lacageed halkaas, iyo cidda aad kala xiriirayso meesha cusub ee aad degtay haddii dhibaatooyin ku haystaan.

Hoy noocee ah ayaan heli doona?

UKBA waxay caadi ahaan ku geyn doontaa qol hoteel ka mid ah, meel sariir & quraac leh, hostel, guri la wada degan yahay ama falaad. Dadka hawsha meelahaas socodsiiya waxaa loogu yeeraa mulkiilayaasha guryaha. Waxay ku siin doonaan gogol, qalabka jikada ama madbakha ee aasaasiga ah isla markaana waxay mas'uul ka yihiin inay idinka caawiyaan la-xiriirista iyo isticmaalista adeegyada ku yaalla aagga aad degan tihiin. Waxay sugi doonaan inaad la xidhiidhid dhakhaatiirta degmada, iskuullada iyo/ama kullejooyinka. Mulkiilaha hoyga aad ku jirtid ayaa mas'uul ka ah in hoygaaga yahay mid xaaladdiisu fiican tahay. Haddii aad qabtid wax walwal ah oo ku saabsan hoygaaga ama helitaanka adeegyada degmada taa la soo qaad mulkiilaha hoyga ama adeegga 'One Stop Service' ee degmadaada. Fadlan xusuusnow in lagu weydiisan karo inaad la wadaagtid qof aanad aqoonin.

Waqti immisa ah ayaan joogi karaa hoyga UKBA?

NASS waxay kaa rajeynaysaa inaad ku sii jirto hoyga lagu siiyay haddii aanay ku siinin ogolaansho aad kaga baxdo. Haddii aad ka baxdo meesha aad degan tahay iyada oo aan lagu ogolaan, UKBA waxay gebi-ahaan kaa joojin kartaa taageerada iyo hoyga lagu siiyo. Haddii aad rabto inaad ka guurto hoyga UKBA doonaysana in qof kale aad la degto, waxaa muhiim ah inaad u sheegto UKBA wixii isbedal ah. Waad sii joogi kartaa hoyga UKBA ilaa iyo inta UKBA ay go'aan ka soo saarayso codsigaaga magangalyo-doonka ah. Haddii UKBA ku siiso go'aan aqbalaad qaxooti, badbaadin bini'aadan ama oggalaansho joogitaan ku-meel-gaadhysiis ah, taageeradii aad ka heli jirtay UKBA waxay dhammaan doontaa 28 maalmood ka dib. Taa macnaheedu waxa weeye inaad ka guurto hoyga gudaha 28 cisho.

UKBA ma i taageeri doontaa haddii aan qaato racfaan magangalyo?

Haddii UKBA diido codsigaaga magangalyo laakiin aad racfaan ku sameysatay gudaha xadkooda, waa aad ku sii jiri kartaa hoygaaga waxana kuu sii socon doona taageeradii aad heli jirtay. Haddii aad ku jirtid dhamaadkii habka magangalyo-doonnimada isla markaana aanay kuu hadhin wax ah xuquuq racfaan, waxay UKBA taageerada kaa joojin doontaa 21 cisho ka dib markii codsigaaga magangalyada si kama-dambeys ah loo diiday. Hase yeeshee, waxa dhici karta inay suurogal kuu tahay inaad codsatid taageerada Qaybta 4 (Section 4 support) – waxa kale oo taa loo yaqaanaa taageero 'dhib daran' (hard case). Fadlan akhriso qoraalka (Asylum Support Partnership) la yidhaahdo 'Are you destitute and at the end of the asylum process?' (Ma tahay qof aan waxba haysan oo gaadhay dhamaadka habkii magangalyo-doonnimada?) oo laga helo <http://languages.refugeecouncil.org.uk> ama qoraalka Golaha Qaxootiga Iskootishka ee la

yidhaahdo 'Section 4 Support', haddii aad ku nooshahay Iskotlaan. La-taliyahaaga sharciga ama hay'adda qaxooti ee kuugu dhow ayaa laga yaabaa inay kaa gargaaraan codsiga. Haddii aad leedahay caruur kugu tiirsan oo da'doodu ka yar tahay 18 sannadood, waa in taageerada lagu sii wado xiitaa haddii sheegashadaada magangalyada la diiday.

Waxaan u baahanahay taageero lacageed kaliya

Haddii aad haysato meel kale oo aad ku nagaato, tusaale ahaan saaxiibo iyo qaraabo qaraabo, waxaad ka codsan kartaa UKBA taageero lacageed kaliya. Waxay qaadataa dhawr todobaad inta ay UKBA qiimayn ku sameyniaysocodsigaaga. Wax taageero ah lama bixin doono mudadan, waxana kaliya ee taageero la bixin doonaa laga bilaabo taariikhda ay UKBA ay dhabtii go'an ka gaadhay codsiga, ee ma aha laga bilaabo taariikhda la soo diray codsiga mana jiraan lacag-siin gadaal laga soo bilaabay oo la heli karo. Haddii UKBA ay ogolaato inay taageero lacageed ku siiso, waxyaabahan ayaa dhacaya:

1. UKBA waxay kuu soo diri doontaa warqad xaqiijinaysa in aad xaq u leedahay taageero lacageed.
2. Waxay ku siin doonaan foojarro ku-meel-gaar ah oo magacooda la yiraahdo tookennada taageerada ku-meel-gaarka ah. Waxay shaqeynayaan kaliya waqti gaaban. Waxaad kaga bedalan kartaa lacag caddaan ah xafiiska boosta.
3. Haddii aad haysato Kaarkaagii Codsiga Diiwaangashan (Application Registration Card) (ARC), waxaad awoodi kareysaa inaad kusoo qaadato lacag-bixintaada joogtada ah adigoo u soo bandhigaya kaarka xafiiska boosta ee lagu cayimay. Sodexho, oo ah shirkadda bixisa lacagta, ayaa kuu soo diri doonta warqad xaqiijinaysa xafiiska la rabo inaad tagtid.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan taageeradaada lacageed ama ay dhibaatooyin ku haystaan, waa inaad wacdaa teleefonka caawinta UKBA oo ah **0845 602 1739** ama booqo adeegga 'One Stop Service' ee kuugu dhow. Fadlan la soco in tani sidoo kale khuseyso dadka hela lacag kaash ah iyo hoy.

Maxaa dhacaya haddii ay iga lumaan tookennadaydu ama kaarka ARC?

Haddii ay kaa lumaan tookennadaadu ama kaarkaaga ARC, ama qof uu kaa xaday, waxaa lagaaga baahan yahay inaad ku wargeliso khasaaraha ama xatooyada Booliiska si aad u hesho takenno cusub ama kaar ARC ah oo cusub. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad ka hesho booliiska caddeyn qoraal ah oo ku saabsan wargelinta, oo waliba leh lambarka tixraaca dambiga, magaca sarkaalka booliiska iyo magaca saldhigga booliiska. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad warbixinta booliiska u fakis-gareyso UKBA taleefoon lambarka **020 8633 0653** ama la xidhiidh adeegga 'One Stop Service' ee degmadaada.

Haddii aad doonayso inaad iska bedasho xafiiska boostada aad ka hesho lacag-bixintaada ama haddii aad dhibaatooyin ku qabto sidii lacagtaada ugu qaadan lahayd kaarka ARC, waa inaad Sodexho ka wacdid khadka gargaarka oo ah **01276 687 099**. Haddii aanad ku hadlin Ingiriisiga, waxaad u baahan tahay inaad weydiisato turjubaan ama saaxiib inuu kaa caawiyo wicitaanka.

Duruufahaygii ayaa isbedalay

Haddii aad heli jirtay taageero lacageed xaaladdaaduna isbedasho aadna u baahan tahay meel aad degto sidoo kale, waxaad codsan kareysaa meel aad degto waqti dambe. Waa inaad la xidhiidhid hay'adda caawinta qaxootiga ee kuugu dhow ee arrintaa kaa gargaari karta.

Maxaa kale oo caawimo ah ayaa UKBA i siin kartaa?

Lacagta Umusha

Waxa aad UKBA ka codsan kartaa deeqda umusha la siiyo marka aad ilmo dhashid. Lacagtaasi waa lacag hal mar ah oo ah £300 oo lagu bixinayo tookenno. Waa in codsiga qoraal ahaan la sameysto bil ka hor maalinta la filayo umusha, ama mudo aan ka badnayn laba todobaad ka dib dhalashada ilmaha. Waa inaad ku soo dartid marag-kaca taariikhda la filayo umusha, ama shahaadada dhalashada ilmaha oo buuxda. Ilmaha dhashay saddex bilood ka hor imaanshada Boqortooyada Midowday ama mudo intaa ka taa yar ayaa iguna sidoo kale xaq u leh lacagta umusha. Fadlan la soco in dadka qaata taageerada 'Section 4' ay kaliya heli karaan £250 oo ah tookenno.

Lacagaha lagu bixiyo dumarka uurka leh iyo caruurta

Dumarka uurka leh iyo xaasaska leh caruurta da'doodu u dhexeyso hal iyo saddex sano ee taageerada ka qaataa UKBA waxay xaq u leeyihiin lacag-bixin dheeri ah oo £3 oo ku sii biiraysa lacagta caadiga ah ee ay UKBA siiyo. Lacag ah £5 todobaadkii oo dheeraad ah ayaa loo heli karaa ilmaha da'doodu ka yar tahay hal sano. Lacag-bixintaa waxa sidoo kale heli kara dadka qaata taageerada 'Section 4'.

Safarka loo aadayo wareysiyada racfaanka iyo magangalyo-doonnimada

Haddii aad taageero hesho, UKBA waxay bixin doontaa kharashka ku baxa safarka wareysiyada ku saabsan racfaanka iyo magangalyo-doonnimadaada. Waxaad ku codsan kartaa gargaar lacageed oo aad iskaga bixisid kharashka safarka. Adeegga 'One Stop Service' ee degmadaada ayaa ka caawin kara codsigan.

War kale

Maxaa dhacaya haddii UKBA diiddo inay i taageerto?

Haddii UKBA diiddo inay ku taageerto, waxaad xaq u yeelan kartaa inaad u cabato garqaade taageero, laakiin kama heli kari doontid wax taageero ah UKBA inta aad sugaysid in go'aan laga gaadho racfaankaaga.

Ma safri karaa?

Xor ayad u tahay ku-safridda Boqortooyada Midowday (UK) laakiin, laakiin, haddii aad ku nooshahay hoyga UKBA, waxaa kaliya oo lagu ogol yahay inaad ka maqnaato wax aan ka badnayn todoba maalmood iyo todoba habeyn oo isku xiga, ama 14 maalmood iyo habeen xilli lix bilood ah. Haddii aad ku talojirtid inaad ka maqnaatid hoygaaga waa inaad ogeysiisid mulkiilaha hoyga. Haddii aad u safrayso meel ka baxsan Boqortooyada Midowday, UKBA wuu joojin doonaa sheegashadaadii magangalyo-doonnimada.

Ma shaqeyn karaa inta aan sugayo go'aan laga gaaro dacwaddeyda magangalyo- doonnimada?

Haddaad tahay qof magangalyo-doon ah laguuma ogola inaad shaqeyso. Hase yeeshe, haddii aad sugaysay mudo ka badan sannad in go'aankii ugu horeeyay laga gaadho codsigaaga magangalyada waxa aad codsan kartaa oggalaansho shaqo. Qareenkaaga ayaa laga yaabaa inuu kaa caawin karo arrintaa. Oof kastaa waxa uu qaban karaa shaqo tabaruc ah taasoo ah hab wacan oo lagu baran karo farsamooyin cusub. Waa in shaqadaasi tahay mid si dhab ah ikhtiyaar u ah lacagna aan lagaa siin. Caadi ahaan kharashka safarka iyo qadada waa la bixiyaa haddii qabatid shaqo tabaruc ah.

Farriin Muhiim ah:

Haddii duruufahaagu is bedaleen, tusaale ahaan, xubin reerka ka tirsani kugu soo biirtay, cinwaankaagii aad bedashay ama aad damacsan tahay codsasho lacag-bixin umul, waa inaad u sheegtaa UKBA ka hor intaan arrimahaasi dhicin haddii ay taasi suurogal tahay. Waa inaad u habsatid in lagu soo daro sheegashadaada magangalyo ama ay mid gaar u leeyihiin, haddii kale taageero uma banaanaan doonto. Waa inaad qoraal u gudbisaa UKBA aad ku wargelinayso sida xaaladahaagu isku bedaleen. Fadlan xafido nuqul ka mid ah waraaqdaada. Ururka qaxootiyada ee hoos ku liis-gareysan ee kuugu dhow ayaa laga yaabaa inuu kaa caawiyaan arrintaa.

Taageero aad heshid marka ay kaa dhamaadaan xuquuqdaada racfaanka magangalyo-doonka

Haddii codsigaaga magangalyo oo uu ku jiro racfaan si buuxda loo go'aamiyay isla markaana ay UKBA kuu sheegtay inay kaa dhamaadeen xuquuqdaadii racfaanku, waxa laga yaabaa inay kuu banaan tahay taageerada UKBA, ee loogu yeedho Section 4 ama taageerada dhib daran (hard case support). Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u codsan kartid taageeradaa, fadlan akhri qoraalka yar ee Asylum Support Partnership ee lagu magacaabo 'Are you destitute and at the end of the asylum process?' (Ma tahay qof aan waxba haysan oo gaadhay dhamaadka habkii magangalyo-doonnimada?) kaasoo laga helo barta <http://languages.refugeecouncil.org.uk> ama adeegga 'One Stop Service' ee degmadaada.

Ilaha laga helayo caawimada iyo talada

Hay'adaha qaxootiga sida Multi-Cultural Resource Centre, Adeegga Qaxootiga ee Waqooyiga Iglan (North of England Refugee Service) Golaha Qaxootiga (Refugee Council), Waxtarka Qaxootiga (Refugee Action), Golaha Qaxootiga ee Iskootishka (Scottish Refugee Council) iyo Golaha Qaxootiga ee Weelashku (Welsh Refugee Council) waa ururrada ugu waaweyn ee siiya tallo iyo gargaarba dadka magangalyo-doonka ah. Waxay aaminsan yihiin in dadka magangalyo-doonka ah iyo qaxootigaba loola dhaqmo si isfahan iyo xushmad leh. Ururradaasi waxay bixiyaan talo iyo warbixin ku sabsan hoyga, taageerada lacagta, magangalyo- doonnimada, caafimaadka iyo arrimaha kaleba iyada oo la marayo adeegyadooda 'One Stop Services' ee ku yaala gobolada kala duwan ee Boqortooyada Midowday (UK). Waa ururro madax-bannaan kana duwan dawladda. Shaqaalaha ururradaasi waxay kugula talin doonaan sida dantaadu ku jirto. Laakiin fadlan ogsoonow inaysan caadiyan bedali kareynin go'aammada waaxyaha dawladdu ka gaaraan kiiskaaga. Ururrada kale sida adeegga La-talinta Waddaniga, tala-bixinta degmada ama kooxaha qaxootiga ayaa laga yaabaa inay bixiyaan talo iyo war bilaash ah.

Multi-Cultural Resource Centre (Northern Ireland)

Tel: 02890 238 645

www.mcrc-ni.org

North of England Refugee Service Head Office (North East)

Tel: 0191 245 7311

www.refugee.org.uk

Refugee Action Head Office (East Midland, North West, South Central, South West)

Tel: 020 7654 7700

www.refugee-action.org.uk

Refugee Council Head Office (London, East of England, Yorkshire & Humberside, West Midlands)

Tel: 020 7346 6700

www.refugeecouncil.org.uk

<http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Scottish Refugee Council

Tel: 0141 248 9799

Freephone: 0800 085 6087

www.scottishrefugeecouncil.org.uk

Welsh Refugee Council

Tel: 019 2048 9800

www.welshrefugeecouncil.org

Asylum Support Partnership consists of:

North of England Refugee Service, charity number: 1091200 www.refugee.org.uk

Refugee Action, charity number: 283660 www.refugee-action.org.uk

Refugee Council, charity number: 1014576 www.refugeecouncil.org.uk

Scottish Refugee Council, charity number: SC008639 www.scottishrefugeecouncil.org.uk

Welsh Refugee Council, charity number: 1102449 www.welshrefugeecouncil.org